# Luqadda Quraanka iyo ilaalinta jiritaanka

Mahad Allaa iska leh, Allaha Caalamka oo kitaabkiisa Kariimka ku yiri:

{كِتَابٌ فُصِّلَتْ آيَاتُهُ قُرْآنًا عَرَبِيًّا لِّقَوْمٍ يَعْلَمُونَ}

**(Waana Kitaab loo caddeeyay aayaadkiisa isagoo Quraan carabi ku qoran ah ciddii wax garan)**

Waxaan qirayaa inuusan jirin Ilaah kale Alle mooyee oo aan lahayn mid wax la wadaago, waxaana qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena Muxammad addoonkiisa uu yahay iyo rasuulkiisa, Allow nabadgalyo iyo naxariis iyo barako korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa iyo qofkii ku raacay wanaag ilaa maalinta qiyaame

Intaas kaddib:

Luqadda waa weelka macaanida iyo dhaqamada qaadaya, waana mid ka mid ah waxyaalaha jiritaanka sugaya, oona saameeya dhismaha qofka, qofkii labo af ku hadlaya waa qof labo dhaqan xambaarsan, qofkii seddex af ku hadlayana waa qof seddex dhaqan xambaarsan, wuxuu akhrinayaa waxa ay soo saaraan caqliyaal badan, laakin luqadda qofka uu ku dhashay ayaa ugu muhimsan dhisidda dhaqankiisa, qofkii aan ogeyn gudaha luqaddiisa uma suurtagalayso inuu ogaado dhabta dhaqanka dadka kale iyo inuu gaaro gudahiisa.

Afka carabiga wuxuu leeyahay arrin u gaar ah oo xeeldheer, waa luqadda Quraanka kariimka iyo sunnada nabawiga sharafta badan, wuxuuna ahaa quraanka kariimka mucjisada ugu weyn u

sugnaatay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee), wuxuu leeyahay Alle (SW):

{إِنَّا أَنزَلْنَاهُ قُرْآنًا عَرَبِيًّا لَّعَلَّكُمْ تَعْقِلُونَ}،

**(Annagaana soo dejinay isagoo Quraan Carabi ah inaad kastaan)**

Wuxuu leeyahay (SW):

{وَكَذَلِكَ أَنزَلْنَاهُ قُرْآنًا عَرَبِيًّا}

**(saasaanu kugu soo dejinnay Quraan Carabi ah)**

Wuxuu leeyahay (caza wa jalla):

{قُرْآنًا عَرَبِيًّا غَيْرَ ذِي عِوَجٍ لَّعَلَّهُمْ يَتَّقُونَ}

**(Waana Quraan carabi ku (qoran) oon qalloclahayn may dhawrsadaan)**

Wuxuu leeyahay Alle:

{وَكَذَلِكَ أَوْحَيْنَا إِلَيْكَ قُرْآنًا عَرَبِيًّا لِتُنْذِرَ أُمَّ القُرَى وَمَنْ حَوْلَهَا وَتُنْذِرَ يَوْمَ الجَمْعِ لا رَيْبَ فِيهِ}،

**((Sidaan ugu waxyoonay Nabiyadii hore) yaan adigana Nabiyow kuugu waxyoonay Quraan Carabi ah saad ugu digtid Reer Maka iyo wax ku hareera (dadka kale) ugana digtid maalinta kulanka (Qiyaamada) shaki male Maalintaas)**

Wuxuu leeyahay (SW):

{ بِلِسَانٍ عَرَبِيٍّ مُبِينٍ}

**(Af Carabi ahoo Cad)**

Wuxuu leeyahay (SW):

{لَقَدْ أَنْزَلْنَا إِلَيْكُمْ كِتَابًا فِيهِ ذِكْرُكُمْ أَفَلا تَعْقِلُونَ}

**(Waxaan idiin soo Dejinay Kitaab Sharaftiinnu ku Sugan tahayee Miyeydaan Kasayn)**

Quraanka kariimka wuxuu isku xiray afka carabiga iyo shaqaysiinta caqliga, wuxuu yiri Alle:

**{إِنَّا أَنْزَلْنَاهُ قُرْآنًا عَرَبِيًّا لَعَلَّكُمْ تَعْقِلُونَ}**

(**Annagaana soo dejinay isagoo Quraan Carabi ah inaad kastaan**)

Muslimiinta waxay la falgaleen quraanka waxayna shaqaysiiyeen caqligooda, waxay soo saareen xadaarad aan la inkiri karin, sidoo kale Alle wuxuu isku xiray afka carabiga iyo in laysugu yeero cilmiga wuxuu yiri Alle:

**{كِتَابٌ فُصِّلَتْ آيَاتُهُ قُرْآنًا عَرَبِيًّا لِقَوْمٍ يَعْلَمُونَ}،**

**(Waana Kitaab loo caddeeyay aayaadkiisa isagoo Quraan carabi ku qoran ah ciddii wax garan)**

Asooo ku boorrinaya raadinta aqoonta uguna yeeraya in la taxqiijiyo taqwada, wuxuu leeyahay Alle (SW):

**{وَلَقَدْ ضَرَبْنَا لِلنَّاسِ فِي هَذَا الْقُرْآنِ مِنْ كُلِّ مَثَلٍ لَعَلَّهُمْ يَتَذَكَّرُونَ * قُرْآنًا عَرَبِيًّا غَيْرَ ذِي عِوَجٍ لَعَلَّهُمْ يَتَّقُونَ}.**

**(Dhab baan ugu caddaynay dadka Quraanka tusaale kasta inay waantoobaan * Waana Quraan carabi ku (qoran) oon qalloclahayn may dhawrsadaan)**.

Qof diidi karo ma jiro inaynan fahmi karin diinteeda fahan sax ah axkaamtana aynan kala soo bixi karin kitaabka rabigeena (caza wa jalla) iyo sunnada nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) markaan si fiican u fahanno mooyee afkeena carabiga, luqadda waa furaha fahanka diinta, wuxuu leeyahay siyidkeena Cabdullaahi bin Cabbaas (Alle raalli haka noqdee):

**(كنت لا أدري ما معنى {فَاطِرُ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ} حتى أتاني أعرابيان يختصمان في بِئْرٍ، فقال أحدهما: أنا فطرتُها، أَيْ: أنا ابتدأتُها)**

(ma ogeyn macnaha (faadirka samadaha iyo dhulka) ilaa ay iiga imaadaan labo reer baadiye ah oo ku doodaya ceel midkooda wuxuu yiri: anaa abuuray: oo laga wado anaa bilaabay), balse culimada usuulka iyo fuqahada iyo kuwo kale waxay ku tiriyeen

in lagu xeeldheeraado luqadda carabiga iyo culuumteeda inay ka mid tahay shuruudaha ijtihaadka midka ugu muhimsan, maxaa ka fiican markuu Xaafid Ibraahiim ka sheekaynayay afkeena carabiga:

**وَسِعتُ كِتابَ اللهِ لَفظًا وَغايَةً * وَما ضِقتُ عَن آيٍ بِهِ وَعِظاتِ**
**فَكَيفَ أَضيقُ اليَومَ عَن وَصفِ آلَةٍ* وَتَنسيقِ أَسماءٍ لِمُختَرَعاتِ**
**أَنا البَحرُ في أَحشائِهِ الدُرُّ كامِنٌ * فَهَل سَأَلوا الغَوّاصَ عَن صَدَفاتي**

**Waan deeqay kitaabka Alle lafdi iyo macnaba***
**Kama caajisin aayado ku sugan iyo wacdiba**
**Sideen maanta uga caajisaa tilmaan qalab***
**Iyo inaan u habeeyo magacyo aalado cusub**
**Bad Ayaan ahay oo gudaheeda luul ku jiro***
**Miyay weyddiiyeen quuseyaasha aleeladeyda**

Sidoo kale qof inkirayo ma jiro garasha la'aanta afka carabiga iyo macnehiisa, iyo ku xeeldheeraan la'aanta fahanka naska iyo garashada waxa la xiriira, iyo in lagu gaabsado qaadashada daahirka iyadoon la ogaanin sirta iyo gudaha taas qalad weyn ayay kugu ridaysaa, qofka wuxuu gaaraa fahan qaldan oo keenaya in la bannaysto dhiigga; sidaa awgeed fahanka kitaabka iyo sunnada waa waajib, wuxuuna ku suurtoobaa barashada carabiga kaliya, wixii waajibka ku dhammaystirmayo waa waajib, wuxuu dhihi jiray saydkeena Cumar bin Alkhadaab (Alle raalli haka noqdee):

**(تعلموا العربية فإنها من دينكم،)**

**(barta carabiga diintiina ayuu ka mid yahay)**, wuxuu soo maray (Alle raalli haka noqdee) dad baranaya tuurid way gafeen markaas ayuu ku qabsaday waxay dhaheen: "إنا قوم متعلمين"

“annaga dad wax barta Ayaan nahay” waxay nasbiyeen wax in la rafciyo ay tahay, wuxuu yiri : qaladkiina luqadda wuxuu igaga daran yahay qaladkiina tuuridda, wuxuu leeyahay Cabdulmalik bin Marwaan (Alle ha u naxariistee): hagaajiya afkiina qofka dhib ayaa qabsada wuxuu soo caariyaystaa maro iyo neef laakin masoo caariyaysan karo luqad, quruxda ninkana waa fasaaxadiisa.

****

Mahad oo dhan waxay u sugnaatay Allaha caalamka, naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaato kan ugu sharafta badan khalqiga sayidkeena Muxammad iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa dhammaan.

Shaki kama taagna in luqadda quraanka ay ururinayso dhaqanka umadda oo ayna ilaalinayso, iyo inay wada deeqayso tiirarka fikirka iyo dhaqanka intay soo jirtay, waxay u damaanad qaadaysaa fikirka umadda jiritaan iyo waaritaan, jiritaanka umaddana wuxuu ku xiran yahay jiritaanka luqaddeeda; ummadaha afkooda tirtirmay iyagana way suuleen waxay ku milmeen dhaqanka ummadaha kale, sidaa awgeed ku dadaalka luqadda wuxuu astaan u yahay ku dadaalka jiritaanka iyo ilaalintiisa, luqadda ayaa tilmaamaysa midnimada safka iyo midnimada hadafka iyo midnimada fikirka, sidoo kale luqadda waa weel dhaqameedka ugu muhimsan ummad kaste iyo dhaqan kaste.

Maxaa inooga baahi badan baraarug iyo in lala dagaallamo iskuday kaste lagu dhalaalinayo jiritaanka, iyo in si dhab looga shaqeeyo inaan xoojino isdifaaca dhaqameedka si looga hortagi lahaa hirarka wax qaadaya oo xoogga badan, iyadoo loo soo marayo in lagu dadaalo luqadda quraanka daryeel fiicanna la

siiyo, waa furaha jiritaankeena, in sharaf loo arko waa sharafta jiritaanka, adeeggeedana waa adeegga diinta iyo dalka.

**Ilaahayow ka ilaali Masar wax kastoo xun iyo dhamaan dalalka caalamka**